



Macluumaadka cusub ee ciyaaraha: Jontae Hardaway ka socday Cleveland oo ku guuleystay horyaalka PIL ee lagdinta ee gobolka

Ardaya ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Dugsiga Sare ee Cleveland ee Jontae Hardaway ayaan noqday horyaalka gobolka isaga oo ku guuleystay horyaalka miisaanka 120-pound ee horyaalada lagdinta ee OSAA Class 6A oo ka dhacay Memorial Coliseum. Hardaway wuxuu ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Newberg ee Christopher Strange kaga guuleystay 6-3 ee ciyaartii horyaalka.

Guushu waxay timiday sanad ka dib markii Hardaway kaalinta labaad uu ka galay lagdinta miisaanka 106. Wuxuu ka guuleystay qofkii horyaal haystay ee soo laabanay ee Stranger, oo sanadkii la soo dhaafay ku guuleystay horyaalka miisaanka 113.

Hardaway wuxuu ahaa mid awood badan bilowgii tartanka gobolka, isaga oo ku guuleystay saddexdiisii ciyaaroood ee ugu horeysay isaga oo sameeyay dhulka ku xajinta ‘pinfall’, taasi oo qaadatay 1 daqiiqo iyo 38 ilbiriqsi; 2:51; iyo 3:18. Ka dibna wuxuu garaacay ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta North Medford ee Jaime Enrique isaga oo kaga guuleystay 6-3 ciyaartii semifinal-ka si uu u gaaro ciyaartii horyaalka.

Hardaway waa ciyaartooyda lagdinta ee u horreeyay oo ka socda Naadiga Dugsiyada Ka Dhheeeya ee Portland oo ku guuleysta horyaalka gobolka tan iyo markii Jasiah Williams oo ka socda Jefferson oo ku guuleystay lagdinta miisaanka 145 ee 2016-kii. Horyaalku wuxuu ahaa guushii sagaalaad ee ciyaartooyda lagdinta ee Cleveland iyo markii u horreeyay tan iyo markii Erica Luna uu ku guuleysatay kii ugu dambeeyay horyaaladiisa saddexda ahaa ee 2009-kii. Luna horyaalkeedii u horreeyay, ee 2007-kii ee lagdinta miisaanka 119, waxay ahayd kii ugu horreeyay ee ciyaartooyda lagdinta ee Cleveland ay ku guuleysato muddo 31 sanadood ah.

Hardaway wuxuu ka caawiyay Cleveland in ay gasho kaalinta 10^{-aad} ee sida kooxuhu u kala horeeyaan Warriors waxay sidoo kale galeen kaalinta saddexaad ee lagdinta miisaanka 113 oo uu galay ardayga ciyaartooyda ah ee sanadka labaad dhigta ee Elijah Fishler, kaalinta shanaad oo uu galay ardayga ciyaartooyda ah ee sanadka labaad dhigta ee Patrick Brown ee lagdinta miisaanka 132, iyo kaalinta lixaad uu galay ardayda ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta ee Dustin Jorgenson ee lagdinta miisaanka 220.

OSAA waxay sidoo kale markii u horreysay qabatay tartanka gabdhaha, iyada oo dhowr ciyaartooyda lagdinta la geliyay, taasi oo uu hoggaanka u hayay ardayga ciyaartooyda ah ee sanadka labaad dhigta ee Piper Staniford, oo galay kaalinta labaad ee lagdinta miisaanka 135. Ardayada ciyaartooyda ah ee sanadka labaad dhigata Lincoln ee Sophie Keefer ayaa gashay kaalinta saddexaad ee lagdinta miisaanka 120, ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Roosevelt ee Marley Zook oo gashay kaalinta afaraad ee lagdinta miisaanka 130, iyo ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Lincoln ee Natalie Brauser oo gashay ee lagdinta miisaanka 170.

Ciyaaraha dheeraadka ah ee kubadda kolaya ee la dejiyay: Kooxaha PIL waxay bilaabi doonaan in ay raadsadaan horyaalada gobolka iyada oo ay ciyaaraha dheeraadka ah ee gobolku socdaan toddobaadkan kuwaasi oo ku bilaabmaya wareega koowaad ee ciyaaraha wiilasha oo dhacaya Talaadada. Grant oo difaacanaysa horyaalka gobolka ayaa martigelinaysa Newberg kaasi oo 7 galabnimo ka dhacaya goobta jimicsiga ee Dugsiga Sare ee Marshall, Jefferson oo kaalinta labaad hore u soo gashay ayaa martigelinaya Bend taasi oo dhacaysa 6 galabnimo, Benson ayaa la ciyaaraysa Jesuit iyada oo dhacaysa 7 galabnimo, Franklin ayaa la ciyaaraysa Lake Oswego iyada oo dhacaysa 7:30 habeenimo iyo Roosevelt oo la ciyaaraysa South Salem iyada oo dhacaysa 7 galabnimo.

Wareega koowaad ee gabdhuhu waa Arbacada, iyada oo Benson oo laabanaya oo kaalinta labaad hore u galay hore uu martigelinayo Lakeridge iyada oo dhacaysa 6:30 galabnimo. Grant waxay martigelin doontaa Glencoe iyada oo dhacaysa 7 galabnimo, iyo saddex kooxood oo PIL ka tirsan oo ciyaari doona ciyaar ay gurigooda ka maqan yihiin. Cleveland ayaa la ciyaaraysa West Linn iyada oo dhacaysa 7 galabnimo, Roosevelt ayaa la ciyaaraysa Oregon City iyada oo dhacaysa 7:15 habeenimo, iyo Wilson oo la ciyaaraysa Grants Pass iyada oo dhacaysa 6:30 galabnimo.

Kooxuhu waa in ay guuleystaan laba jeer si ay ugu gudbaan tartamada gobolka ee toddobaadka soo socda ka dhacaya Xarunta Chiles ee Jaamacadda Portland. Kooxaha oo dhammeystiran, booqo [website-ka OSAA](#).